
# SHARCIGA XAKAMEYNTA CARRUURTA EE GOBOLKA OREGON

## XAKAMEYNADA RIKAABKA CARRUURTA MA AHAN IQTIYAAR, IYAGA AYAA SHARCIGA AH!

Dhammaan carruurta waa in lagu xakameeyaa nidaamka xakameynta carruurta ku haboon iyada oo la raacayo gaariga, illaa suunka qofka weyn ula ekaado si ku haboon. Nidaamka xakameynta carruurta ku haboon waa midka buuxiyo cabirka canuga iyo cabirka ay ku taliyeen soo saaraha.

Dhalashada | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 | 11 | 12+



Da'da lagu talliyay way ka duwantahay nooca korsi walba wuu ka duwanyahay tixgelinta kala duwanaanshaha hormarka canuga, kobaca iyo xadeynada dhirirka/culeyska ee kuraasta gaariga iyo xoojiyaha korsiga. Isticmaal buugga milkiilaha ee korsiga gaariga ama xoojiyaha korsiga si aad u hubisid gelinta iyo xadeynada dhirirka/culeyska korsiga, iyo isticmaalka korsiga ku haboon. Haddii canuga sideed sanno jir yahay ama ka yaryahay IYO ka hooseeyo dhirika 4'9", sharciga Oregon wuxuu u baahanyahay inaad sii wadid isticmaalida nidaamka xakameynta canuga.

### KORSIGA GAARIGA GADAAL-UJEEDO

**Dhalashada oo illaa ugu yaraan sannadka 2**

Canuga wuxuu raacaa gadaal- wajaheyso korsiga gadaal iyada oo la isticmaalayo xakameynta illaa ugu yaraan sannadka 2 ama illaa ay ka gaaraan xadeynta culeyska kore ama dhirirka ee korsiga gaariga. (Kuraasta la badeli karo waxaa loo isticmaali karaa labadaba gadaal iyo horay ujeedo.)

**Gadaal - Booska Xakameynta Wajahayo**

- Ku xakamey xargaha ama garbaha ka hooseeyo.
- Ku qabo booska xakameynta ee xabadka u dhaxeeyo kilkisha.

**Gelinta**

Gadaal- Wajahayo korsiga gaariga waa in lagu dhajiyaa gaariga oo midkood suunka korsiga gaariga ama qabtaha hoose.

Kuraasta gaariga si ku haboon loo geliyay waa inaysan dhaqaaqin wax ka badan hal inji dhinac ku dhinac iyo horay iyo gadaal.

**Marnaba ha gelin korsiga gaariga ee gadaal wajahayo oo ayabaaga shaqeynayo.**

### KORSIGA GAARIGA HORAY-WAJAHAYO

**Sannadka 2 illaa ugu yaraan 40 boon**

Markii canuga ka koro korsigooda gaariga ee gadaal wajahayo waa inay weli raacaan korsiga gadaal, korsiga gaariga ee horay u jeedo ee leh xakameynta illaa ayka cabiraan ugu yaraan 40 boon ama ay gaaraan dhirirka kore ama xadeynta culeyska ee korsiga gaarigooda xakameysan ee horay u jeedo. (Koraasta la badeli karo waxaa loo isticmaali karaa labadaba gadaal iyo horay u jeedo/ kuraasta isku darka waa isku darka horay u jeedo iyo xakameynta iyo xoojiyaha.)

**Horay- U jeedo Booska Xakameynta**

- Booska xariga xakameynta ama ka sareeyo garbaha.
- Ku qabo booska xakameynta xabadka u dhaxeeyo kilkisha.

**Gelinta**

Kuraasta horay u jeedo waa in lagu soo lifaaqaa gaariga oo leh midkood suunka korsiga gaariga iyo darbiga (haddii la heli karo) AMA qabtaha hoose iyo darbiga.

Kuraasta gaariga si ku haboon loo geliyay waa inaysan dhaqaaqin wax ka badan hal inji dhinac ku dhinac iyo horay iyo gadaal.

### KORSIGA XOOJIYAHA

**Da'da 4 illaa ugu yaraan da'da 8**

Waxaa lagu talliyay in carruurta raacaan korsiga gadaal iyada oo la isticmaalayo korsiga gaariga oo leh xakameynta illaa ay ka gaaraan culeyska kore ama xadeynta dhirirka ee lagu ogolyahay soo saaraha korsiga gaariga.

Markii canuga ka weynaado korsigooda gaariga horay wajahayo iyo xakaameynta, waa waqtiga loo wareejin lahaa korsiga xoojiyaha, iyaga oo weli raacayo korsiga gadaal ee gaariga. (Korsiga isku darka waa isku darka horay u jeedo oo leh xakameynta iyo  xoojiyaha)

**Booska Suunka Korsiga Xoojiyaha:**

- Suunka garabka wuxuu ku dhuuqsanyahay garbaha iyo xabadka oo ma dhaafsano qoorta iyo wajiga.
- Suunka dhabta wuxuu ku fadhiyaa dhinaca bowdada (ma ahan caloosha).

**Gelinta**

Kuraasta xoojiyaha ayaa isticmaalo suunka korsiga ee lagu xakameynayo canuga oo ku caawiyo hagida suunka in laga saaro qoorta canuga oo wajaho oo kor uga qaad canuga boos ku hayo suunka dhabta caloosha.

### SUUNKA FADHIGA

**8 + Sanno**

Suunka badqabka ee gaarigaaga waxaa loo naqshadeeyay inuu la ekaado dadka weyn, ma ahan carruurta.  Sababtoo ah carruurta waxay ku koraan heerar kala duwan, waxay weli u baahan karaan korsiga xoojiyaha u dhaxeeyo da'da 8-12+. Sharciga Oregon wuxuu u baahanyahay la ekaansho ku fillan ee suunka korsiga qof weyn.

**Suumanka waxay ula egyihiin si ku haboon:**

- Suunka dhabta wuxuu ku fadhiyaa dhinaca bowdada (ma ahan caloosha).
- Suunka garabka wuxuu ku dhuuqsanyahay garbaha iyo xabadka oo ma dhaafsano qoorta iyo wajiga.
- Carruurta waa inay si ku fillan u dheeraadaan si ay markaas si raaxo leh ugu qalooociyaan jilbahooda oo geeska korsiga gadaal oo dhabarkooda ku aadan korsiga gaariga.

Waxaa si sareyso loogu talliyay in carruurta oo dhan ee ka hooseyso da'da 13 si ku fillan u raacaan oo ku xaniban korsiga gadaal.

**Korsiga hore**, darawalka iyo rikaab walba waa inuu xirtaa suunka korsiga, hal qof suunkiiba. Darawalka iyo rikaabada korsiga hore oo da'dooda ah 16 ama ka weyn waxaa la ganaaxi karaa illaa $115 midkiiba oo ku guuldareysiga lagu xiranayo suunka korsiga.

**Dage walba**, oo aan laga eegin da'da ama booska fadhiga waa in lagu xakameeyaa xakameynta badqabka ah. Rikaab walba ee ka hooseeyo da'da 16 waa inuu xirtaa suunka korsiga ama isticmaalaa nidaamka xakameynta badqabka canuga ku haboon. Darawalka waa inuu hubiyaa in rikaab walba ee ka hooseeyo da'da 16 cadeeco sharciga. Darawalka waxaa la ganaaxi karaa $115.

Tallooyinka badqabka canuga rikaabka ah: Machadka Mareykanka ee Cudurada carruurta, Maamulka badqabka Taraafikada Wadada weyn ee Qaranka (NHTSA), iyo Xarunta Badqabka OHSU Doernbecher.  Naqshada sawirka ee laga soo saaray NHTSA iyo Xarunta Illaha Qaxootiga ee Mohawk Valley.

STATE OF OREGON 1859

THE UNION

04/2021

# Baaritaanada iyo Illaha Korsiga gaariga



**Jawaabta Caafimaadka Mareykanka**
Soo wac 503-736-3460 si aad u balansatid balanta qof ahaanta

**Isbitaalka Carruurta ee OHSU Doernbecher**
Soo wac 503-418-5666 si aad u balansatid balanta onleenka ama qof ahaanta

Ama booqo:

www.doernbecher.com/carseatoutreach

**Xarunta Caafimaadka ee OHSU Hillsboro**
Soo wac 503-418-5666 si aad u balansatid balanta onleenka ama qof ahaanta

**Isbitaalka Carruurta Randall ee Legacy Emanuel**
Soo wac 503-418-5666 si aad u balansatid balanta onleenka ama qof ahaanta

**Xarunta Illaha Korsiga Gaariga Saameynta Oregon**
Soo wac 503-899-2220 si aad u balansatid balanta qof ahaanta

**Si aad u heshid saldhiga baaritaanka korsiga gaariga iyo/ama rugta korsiga gaariga soo socdo ee adiga kuu dhow fadlan booqo:**

www.oregonimpact.org

Kuraasta gaariga qarashka hooseeyo iyo korsiga xoojiyaha waxaa laga heli karaa dhinaca deeqda ODOT TSD
Loo heli karo qoysaska u-qalma – weydii marka aad balansaneysid balan

OHSU DOERNBECHER CHILDREN'S Hospital · AMR AMERICAN MEDICAL RESPONSE · RANDALL CHILDREN'S HOSPITAL LEGACY EMANUEL · SAFE KIDS PORTLAND METRO · OREGON IMPACT